Oregon Department of Human Services
OFFICE OF DEVELOPMENTAL DISABILITIES SERVICES

Farriintan waxaa si dhaqso ah loo soo gelin doonaa onlaynka iyadoo ku qoran اللغة العربية, English, Русский, Soomaali, Español, 简体中文 iyo Tiếng Việt.

**Diseembar 5, 2024**

**Ku socota**: Ururka naafanimada garaadka iyo korriinka (I/DD), danwadaagta Qabaa'ilka iyo shaqaalaha ODDS
**Ka socoto:** Dana Hittle, Agaasime Ku-meelgaar ah, Xafiiska Adeegyada Korriinka Naafada (ODDS)
**Mawduuca:** Adeegyadeena iyo Codsiga Miisaaniyadeed ee Guddoomiyaha

Ma nabad baa,

Markay ahayd Tallaadada, Guddoomiye Tina Kotek ayaa shaacisay Codsiga Miisaaniyadeed ee Guddoomiyaha (Governor's Recommended Budget, GRB). Kani waa soojeedinta miisaaniyadeed ee laba sannadlaha ah ee 2025-27. Waxaa ku jira tallooyinka Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Oregon (Oregon Department of Human Services, ODHS).

Codsiga Miisaaniyadeed ee Guddoomiyaha (GRB) ee soojeedinta ah ee loogu talagalay ODDS guud ahaan waa $6.37 bilyan oo doolar. Tani waxaa ka mid ah:

- 17% korodh ah oo ku yimid Miisaaniyadda Sida Sharciga ah Loo Ansixiyay si loo taageero tirada kiisaska ee kordhay iyo kharashka ku baxaya kiis walba.
- Lacagaha iyo go’aamada dheeraadka ah ee lagu wanaajinayo shatiyeynta iyo hanti-dharida bixiyeyaasha adeegga dadka qaba naafanimada garaadka iyo korriinka (I/DD) si loo xaqiijiyo badqabka iyo u-hoggaansanaanta sharciga.
- Go’aamada lagu buuxinayo shuruudaha sharciyeed ee cusub ee helitaanka caymiska Medicaid.
- Lacagaha lagu xoojinayo hawsheena xaqsoorka, barnaamijka adeeg-bixiyeyaasha Qabaa’ilka, cilaaqaadka dawlad-ka-dawlad iyadoo ay ka jiraan Sagaal Qabiil ee Ay Dawladdu Aqoonsan Tahay gudaha Oregon.

Maalgelintan la soojeediyay ayaa ka caawin doonta ODDS inay si habboon u xaqiijiyaan hadafka ay ku wanaajinayaan xaqsoorka adeeg, gaarista shakhsiyaadka iyo bulshooyinka aan si buuxda loogu adeegin, iyo hubinta badqabka iyo fayo-qabka shakhsiyaadka hela adeegyadayada iyo shaqaalaha taageera shakhsiyaadkaas.

Codsiga Miisaaniyadeed ee Guddoomiyaha (GRB) ayaa sidoo kale lagu soojeediyay dhimis in lagu sameeyo miisaaniyadda hawl-socodsiinta ee Qaybta Xasillinta iyo Xiisadaha (Stabilization and Crisis Unit, SACU) ee bilaabmi doonta Luulyo 2026. Hoggaanka ODHS iyo shaqaalaha ODDS

way maqleen warkan murugadda leh. Fadlan sii wad inaad akhrido farriintan si aad wax badan uga ogaato waxa ay ka dhigan tahay dhimistan miisaaniyadeed ee la soojeediyay.

## Maxay dhimista miisaaniyadda uga dhigan tahay SACU?

Hadafka SACU waa inay u adeegto shakhsiyaadka qaba naafanimada garaadka iyo korriinka (I/DD) ee ku dhibaatoonaya waana inay xasilliso. Adeegyada SACU waxaa loogu talagalay inay noqdaan kuwo muddo gaaban socda iyo inay taageeraan shakhsiyaadka si ay si fiican ugu dhex noolaadaan bulshadooda.

SACU way ku dhibtootay inay gaarto hadafkan, gaar ahaan dadka waaweyn. Dad badan ayay u noqotay degaan muddo-dheer, xitaa kadib marka shakhsiyaadku dhibaato aysan wajahayn. Isla mar ahaantaana, kharashaadka ku baxa SACU ayaa in badan kordhay.

Hoggaanka ODHS iyo Guddoomiyaha waxay u arkaan geedi-socodka diyaarinta miisaaniyadda inay fursad u siinaysa SACU inay dib diirada u saarto ujeeddadeedii hore: barnaamijka xasillinta dhibaatada ee muddada gaaban oo sida wanaagsan u taageeraysa shakhsiyaadka iyo shaqaalaha qabta shaqooyinka muhiimka ah maalin kasta.

Guddoomiyuhu way caddahay in ujeedkeedu uusan ahayn in albaabada la isugu dhufto qaybta SACU. Waxay weydiinaysaa Sharci-dejinta, Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Oregon (Oregon Department of Human Services, ODHS), iyo dadka qaba naafanimada garaadka iyo korriinka (I/DD) si ay u

tixgeliyaan hadafka iyo qaabdhismeedka qaybta SACU. Arrintani waxaa ku jira dejinta qorshe:

- Dib looga dhigayo SACU qaybta xasillinta muddada gaaban.
- Dib loogu qiimaynayo tirada guriyeed ee qaybta SACU u baahan tahay si loo gaaro ujeeddadaas.
- Xoojinaya oo wanaajinaya adeegyada qofku udub-dhexaadka u yahay ee ay bixiso qaybta SACU iyo adeeg-bixiyeyaasha bulsheed si loo hubiyo in shakhsiyaadka ka tagaya qaybta SACU ay si badqab leh ugu noolan karaan oo ay u dhexgeli karaan bulshadooda.

Su'aalaha ay tahay inaan si wadajir ah u tixgelinno waa: Sideen si wanagsan ugu taageeri karnaa shakhsiyaadka dhibaataysan si loo xasilliyo oo ay dib ugu laabtaan bulshadooda? Sideen taageerooyinkan ugu fidin karnaa shakhsiyaadka ka mid ah bulshooyinka ku nool gobolka oo dhan? Sideen u horumarin karnaa una xaqiijin karnaa helitaanka adeegyada lagama maarmaanka ah si aan si badqab leh ugu taageerno shakhsiyaadka bulshooyinkooda dhexdooda marka aysan dhibaato haysan?

Fadlan ogow: Miisaaniyadda kamadambaysta ah go’aan lagama gaarin. Sharci-dejinta ayaa gaari doonta go'aannada miisaaniyadeed ee kama dambaysta ah marka la gaaro Juun 2025.

### Maxaa imminka iska beddelaya qaybta SACU?

Waxaan maqalnay inay dadku ka xumaadeen warkan ku saabsan SACU. Waxaan fahamsanahay suurtagalnimada inuu isbeddel dhaco inay noqon

karto mid cabsi leh. Waan taageeri doonaa shaqaalaha qaybta SACU iyo shakhsiyaadka ay taageeraan inta lagu gudajiro geedi-socodkan. Hadafkayagu weli waa badqabka, caafimaadka iyo fayo-qabka dhammaan dadka jooga qaybta SACU.

Waxaan sidoo kale maqalnay xan ay bulshadu isla dhex marayso oo ku sabsan in qaybta SACU ay hadda xirayso guryaheedii oo dhan. Tani run ma ahan. Waa kuwan xaqiiqooyinka:

- **Ma jiraan wax isbeddelo ah oo hadda dhici doona. Shakhsiyaadka ay u adeegto qaybta SACU ayaa sii heli doona isla adeegyada ay helaan.**
- Qaybta SACU ayaa weli u heellan inay ilaaliso caafimaadka, badqabka, farxada iyo taageerada buuxda ee la siiyo shakhsiyaadka.
- Laba guri oo ay leedahay qaybta SACU ayaa la xiri doonaa Janaayo 31, 2025. Guryahan waa Eliot 2 oo ku yaala Portland iyo Weirich oo ku yaala Lubnaan. Ma jiraan guryo kale oo la xirayo wakhti xaadirkan. ODDS ayaa gaari doonaan go'aankan kahor GRB. Shakhsiyaadka loogu adeego guryahan ayaa mar hore u guureen guryo ay leedahay qaybta SACU oo goobta ka ag dhow. Shaqaalaha ka socda guryaha xirmayaa ayaa ka shaqaynaya guryaha kale ee qaybta SACU.

### Waa maxay tallaabooyinka xiga ee geedi-socodka miisaaniyada?

Bisha Janaayo, Golaha Sharci-dejinta Oregon ayaa isku arkaya “Kulanka Muddada Dheer.” Sharci-dejinta ayaa ka doodi doonaan GRB waxayna go'aamin doonaan waxa barnaamijyada gobolku ay qaban doonaan. Bisha Juun, Golaha Sharci-dejinta ayaa meel marin doona miisaaniyadda gobolka ee labada sanno ee soo socota.

Marka laga hadlo ODDS, geedi-socodka dejinta miisaaniyadda ayaa waxaa ku jiri doona wadahadal ku saabsan ODDS iyo adeegyadooda. Waxaan bilaabi doonaa inaan ka shaqayno waxyaabaha la soo jeediyay ee qaybta SACU looga dhigayo barnaamijka xasillinta muddada gaaban kaasoo ka caawin doona shakhsiyaadka inay dib ula qabsadaan bulshadooda. Ficiladayada waxaa ka mid noqon doona:

- Abuurida koox qorshayn oo iskood u doodeyaal ah, shaqaalaha ODHS, wakiilada ururrada shaqaalaha, madaxda sharci-dejinta, iyo bixiyeyaasha adeegyada bulsheed iyo danwadaagta.
- La shaqaynta kooxaha kor ku xusan si loo helo xal loona sameeoyo jadwal marka miisaaniyaddu noqoto mid cad.
- In lala wadaago geedi-socodkan dhammaan dadka ku nool ama ka shaqeeya qaybta SACU, ururrada shaqaalaha, sharci-dejiyeyaasha, iyo dadka qaba naafanimada garaadka iyo korriinka (I/DD).

Ma garanayno waxa ay sharci-dejintu go’aamin doonaan. Haddii Golaha Sharci-dejintu ay ansixiyaan dhimista miisaaniyadda qaybta SACU, waxay u badan tahay inay hawshu bilaabin donto bisha Luulyo 2026. Tani waxay ina siinaysaa wakhti aan si wadajir ah ugu diyaargarowno.

## Dhigaalada iyo macluumaadka dheeraadka ah

Waanu kula socodsiin doonaa geedi-socodkan oo dhan. Wixii ku soo kordha waan idinla soo socodsiin doonaa.

Inta lagu gudajiro Kalfadhiga Sharci-dejinta, waxaanu martigelin doonaa kulamo cusub oo toddobaadle ah. Kullamadani ayaa saacadaha qaddada

ka dhici doona-ka Zoom. Waxaan soo diri doonaa iimayl bisha Janaayo oo wata gujoraacyada kulanka iyo tafaasiil dheeraad ah. Sidoo kale waxaad ka eegi kartaa boggayaga mareegeed ee kaqaybgalka bulshada macluumaadkaas iyo fursadaha kale ee la heli karo si aad inoo siiso jawaab-celintaada.

Macluumaadka iyo dhigaalada la xiriira qaybta SACU iyo miisaaniyadda ayaan soo gelin doonaa bogga mareegeed ee qaybta SACU. Waxaan diyaarinaynaa su'aalaha inta badan la isweyddiiyo waxaana qorshaynaynaa inaan soo dhejino isbuuca soo socda. Haddii aad wax su'aalo ah ka qabto arrintan, fadlan ku soo hagaaji iimaylka odds.questions@odhs.oregon.gov. Mahadsananid.

Mar labaad, waan ognahay warkan ku saabsan dhimista miisaaniyadda ee suurtagalka ah ee qaybta SACU inuu noqon karo mid murugo ama jahawareer ku keeni kara qaarkiin. Si aad u weydiiso shaqaalaha ODDS wixii su'aalo ah, noogu soo dir iimaylka odds.questions@odhs.oregon.gov.

Mustaqbalka, waxaan mudnaanta ugu sarraysa siin doonaa badqabka iyo fayo-qabka shakhsiyaadka aan u adeegno.

Daacadnimo,



Dana Hittle

Agaasimaha Kumeelgaarka ah

Xafiiska Adeegyada Naafanimada Korriinka (Office of Developmental Disabilities Services, ODDS)

---

Isku diiwaangeli kolba wixii soo kordha xafiiska ODDS.

Ka akhri farriimaha Agaasimaha ODDS barta https://www.oregon.gov/odhs/agency/Pages/odds.aspx#dm.

Nagala soco Facebook-ga @oregonDHS.IDD.

Waxaad ku heli kartaa bilaash dhukumintigaan isagoo luuqado kale ku qoran, ku qoran far waawayn, qoraalka indhoolayaasha ama qaabka aad jeceshahay ku qoran. Kala xiriir Oregon ODDS lambarka 503-945-5811 ama dd.directorsoffice@odhsoha.oregon.gov. Waxaanu aqbalnaa wicitaanada dhammaan noocyada adeegga gudbinta ee loogu talagalay dadka Dhegaha La', Maqalka Ku Adag Yahay, Dhegaha iyo Indhaha La', dadka aragga la’ ama araggoodu hooseeyo. Si aad u hesho wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyeyaasha adeegga gudbinta booqo https://www.oregonrelay.com ama https://www.fcc.gov/general/internet-based-trs-providers.